

## Nala Soo Xiriir

### Taleefan

206-296-VOTE (8683)

1-800-325-6165

TTY Relay: 711

### limeel

elections@kingcounty.gov

### Oonleen

kingcounty.gov/elections

### Boostada ama shakhsi ahaan


Xarunta Dhexe ee Doorashooyinka

919 Southwest Grady Way

Renton, WA 98057

Furan Isniinta ilaa iyo Jimcaha

8:30 a.m. – 4:30 p.m.



## Naga soo booqo baraha bulshada

 [twitter.com/kcelections](https://twitter.com/kcelections)

 [facebook.com/kcelections](https://facebook.com/kcelections)

 [instagram.com/kcelections](https://instagram.com/kcelections)

## Codaynta La Heli Karo

Xarumaha codbixinta ayaa u soo bandhiga qalabka caawinaada dadka ay ku adag tahay dhammeystirida warqaddaha codbixinta ee boostada lagu soo diray. Haddii ay wax dhibaato ah kaa soo wajahayso inaad dhiibato codkaaga, fadlan la soo xiriir taleefanka 206-296-VOTE (8683)

## Agabyada codbixinta ee luuqadaha kale

Marka lagu daro Ingiriiska, Doorashooyinka Degmada King waxay warqaddaha codbixinta iyo dhammaan agabyada codbixinta ku soo saaraan luuqadaha Fiyatnamiiska, Isbaanishka, Kuuriyaanka, Ruushka, Shiinaha, iyo Soomaaliga.

Nala soo xariir si aad u codsato agabyada codbixinta ee mid ka mid ah luuqadahaas.

**codeyn!**

# Hagaha si aad uga Codeyso Degmada King



## Yaa is diiwaan gelin kara si uu u codeeyo

Waa inaad tahay muwaadin, si sharci ah ku degan Gobolka Washington, ugu yaraan lix iyo toban sanno jir ah, aanan laga mamnuucin codbixinta amar maxkamad awgeed, iyo aanan iminka xabsi ugu jirin xukun dambi-wayn lagugu xukumay darteed.

Caruurta 16 iyo 17 sanno jirada ah waxay awood u leeyihiin inay hore isu sii diiwaan geliyaan si ay u codeeyaan waxayna si toos ah u heli doonaan warqadaha codbixinta markii ay u qalmaan/xaq u yeeshaan inay codeeyaan.



Laga bilaabo Janaayo 2022, xuquuqda codeynta ayaa dib loogu soo celinayaa qof walba oo lagu xukumay dambi-wayn isla markii xabsiga laga soo daayo - ayadoo aanan loo eegeynin xaaladooda kormeerida bulshada. Kuwa horay dambiyo-wayn loogu xukumay waxay u baahan yihiin inay is diiwaan geliyaan si ay u codeeyaan kadib marka la soo daayo.



Caruurta 17 sanno jirada ah ee geli doona 18 sanno ka hor doorashada guud waxay codkooda dhiiban karaan doorashada hordhaca ah. Haddii horay loo sii diiwaan geliyey, 17 sanno jirada u qalma waxay si toos ah u heli doonaan waraaqahooda codbixinta doorashada ugu horeysa ee ay u qalmaan inay codeeyaan.

## Hel warqaddaada codbixinta

Marka aad diiwaan gashan tahay si aad u codeeyso, warqaddaada codbixinta waxaan kuugu soo diri doona ciwaankaada boostada saddex asbuuc ka hor doorashada soo socota, ciidamada iyo codbixiyaasha wadanka dibadiisa jooga intaa ka sii hore ayay helaan warqadaha codbixinta.

## Baro waxa ku qoran warqaddaada codbixinta

Doorasho kasta ka hor, waxaad sidoo kale heli doontaa buug-yaraha codbixiyaasha oo ay ku jiraan bayaanada iyo macluumaadka xiriirka musharixiinta iyo xog dheeraad ah oo ku saabsan hindisooyinka warqadda codbixinta.

Waxaad sidoo kale ka heli kartaa hagaha codbixiyaasha shakhsi ahaaneed kaas oo ka koobnaan doona tartanada aad xaqa u leedahay inaad ka codeeyso oo kaliya barta [kingcounty.gov/elections/my-voter-information](http://kingcounty.gov/elections/my-voter-information).

## Ku codee warqaddaada codbixinta

Isticmaal qalin midab kasta ah si aad ugu buuxiso goobaabinta ku dhinac taalo dookhaaga ee tartan kasta. Haddii aad khalad sameyso, xariiq dulmari dookhaas oo dhan, oo ay ku jirto goobaabinta, kadibna buuxi goobinta ku dhinac taalo dookhaaga cusub. In kasta oo aan kugu dhiirgelineyno inaad codeeyso dhammaan warqaddaada codbixinta, waxaad ka boodi kartaa codeynta tartan kasta oo aad rabto waxaana kaliya aan tirin doona tartanada aad codeysay.

## Saxiix bakhshaddaada soo celinta

Si warqaddaada codbixinta loo tiriyo, waa inaad saxiixdaa bayaanka caddaynta ku qoran bakhshada soo celinta iyo saxiixaagana waa inuu si dhow ugu dhigmo saxiixa ku qoran diiwaankaada diiwaan gelinta codbixiyaha. Saxiixaaga uma baahna in lagu qoro far isku dardarsan ama xitaa far si fudud loo akhriin karo, kaliya waa inuu u dhigmo midka faylka diiwaan gelinta ku jiro. Haddii saxiixaaga uusan u dhigmin ama uu dhammaantii maqan yahay, waxaan kuu soo diri doona warqad sidoo kale taleefan iyo iimeel ayaan kugula soo xiriiri doona haddii xogtaada xiriirka ay faylka noogu jirto. Waxaan kaliya oo aan kaaga baahanahay inaad buuxiso oo aad soo celiso foom fudud.

## Soo celi warqaddaada codbixinta

Waxaad sidoo kale ku soo celin kartaa warqaddaada codbixinta adeega boostada, Xarunta Codbixinta, ama Xarunta Hawlgalinta Ka qaybgalka Ardayga (Student Engagement Hub), ama mid ka mid ah in ka badan 70 sanduuq oo ammaan ah oo warqadaha codbixinta lagu rido oo ku yaala guud ahaan Degmada King – shaabad boosto looma baahna.

Haddii aad doorato inaad warqaddaada codbixinta ku soo celiso adeega boostada, waxaan kugula talineynaa inaad boostada ku rido ugu dambayn Jimcaha ka horeysa Maalinta Doorashada si loo xaqiijiyey in waqtigii loogu talagalay loogu calaamadeeyo shaabada boostada. Si loo tiriyo warqaddaada codbixinta, waa in shaabada boostada lagu calaamadeeyaa ugu dambayn Maalinta Doorashada ama lagu rido sanduuqa warqadda codbixinta ugu dambayn 8 p.m. oo gaw ah.

## Raad-raac warqaddaada codbixinta

Hubi raad-raaca warqadda codbixinta ee oonleena si aad u xaqiijiso in warqaddaada codbixinta la helay oo ugu dambayn la tiriyey. Sidoo kale, raad-raaca warqadda codbixinta ee oonleena waa habka ugu dhakhsiyaha badan ee aad ku arki karto haddii ay cillad ka jirto saxiixa warqaddaada codbixinta si markaa aad u xalliso oo codbixintaada loo tiriyo. Raad-raac warqaddaada codbixinta barta [kingcounty.gov/elections/ballot-tracker](http://kingcounty.gov/elections/ballot-tracker).